Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee markuu Janaabo ka qabaysanayo wuxuu dhiqi jiray Gacmihiisa, wuxuuna u weyso qaadan jiray sida Salaada uu ugu weyso qaato, ka dibna wuu qubaysan jiray

Caa'isha, Mu'uminiinta Hooyadood -Allaha ka raali ahaadee-waxaa laga wariyey inay tiri: Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee markuu Janaabo ka qabaysanayo wuxuu dhiqi jiray Gacmihiisa, wuxuuna u weyso qaadan jiray sida Salaada uu ugu weyso qaato, ka dibna wuu qubaysan jiray, isagoo Faraha dhex galinayaTtimihiisa ilaa uu Jirkiisa Biyaha wada gaarsiiyo, seddex jeer ayuu Biyaha isku shubi jiray, ka dibna jirkiisa kale oo dhan ayuu dhaqi jiray, waxay tiri- Caa'isha-: aniga iyo Rasuulka weel kaliya ayaan ku wada qubaysan jirnay, oo aan labadayadu kawada darsan jirnay Biyaha.

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Albukhaari]

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee markuu rabo inuu Janaabo ka qabaysto, wuuu ku bilaabi jiray inuu Gacmaha dhaqo. Ka dibna wuu weyso qaadanayey sida weysada Salaada, ka dibna Biyaha ayuu Jirkiisa gaarsiin jiray, ka dibna Gacmaha ayuuTtimaha Madaxa dhex galin jiray, ilaa uu is dhoho Biyuhu waa gaareen Timaha salkooga, Jirkuna uu ka dhergay Biyaha, seddex jeerbuu Madaxiisa Biyaha ku shubaayey, ka dibna Jirkiisa kale ayuu dhaqi jiray. Caa'isha -Allaha ka raali ahaadee- waxay tiri: Aniga iyo Rasuulka nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ayaa weel kaliya ku wada qubaysan jirney, oo Biyaha ka wada darsanaynay.

http://www.sunnah.global/hadeeth/so/show/3316